Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 3aad Muqdisho, 2015 Lr. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN SANADLE**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

# 2015

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL
مكتب المحامي العام لدولة

**XEER RA'IISUL WASAARE Lr. 000351** Taariikh: 27/08/2015

**ANSIXINTA QAAB-SIYAASADEEDKA LAGULA DHAQMAYO SOOMAALIDA LAGA SOO MUSAAFIRINAAYO DIBADDA**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Markuu arkay:** Qof. 99aad (a), (b), (e) & (f) ee Dastuurka JFS.

**Markuu arkay:** Qod. 100aad, (a) & (d) ee Dastuurka JFS.

**Markuu arkay:** Talada wada-jirka ah ee Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Dhiiri-gelinta Maal-gashiga

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Summaddiisu tahay SHGW.00.32.08.15 ee 27/08/2015, kuna saabsan **"Ansixinta Qaab-Siyaasadeedka Lagula Dhaqmayo Soomaalida Laga Soo Musaafirinaayo Dibadda"**, oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyay:** Baahida loo qabo ansixinta **"Qaab-siyaasadeedka lagula dhaqmayo Soomaalida laga soo musaafirinaayo dibadda".**

**Wuxuu Xeeriyay**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.32.08.15 ee 27/08/2015, kuna saabsanaa **"Ansixinta Qaab-siyaasadeedka lagula dhaqmayo Soomaalida laga soo musaafirinaayo Dibadda"**, oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Wasaaradda Amniga Qaranka awood loo siiyey in ay la tacaamusho hay'adaha socdaalka Waddamada Dibadda ee gacanta ku haya arrimaha Soomaalida laga soo musaafurinaayo Dalalkaas, iyadoo la eegayo heshiiska caalamiga ah ee Xuquuqul insaanka u degsan.

**Qodobka 3aad**

Qaab-siyaasadeedkan, wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee JFS.

Mudane Cumar Cabdirashiid Cali Sharmaarke Sharmaarke
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYEY
DIWAAN NO. 44/1114/2015
TAARIIKH 15/9/2015
SAXIIXA NO.

**"QAAB SIYAASADEEDKA LAGULA DHAQMAYO SOOMAALIDA LAGA SOO MASAAFURINAYO DALALKA CAALAMKA"**

**JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA AH EE SOOMAALIYEED**

**WASAARADDA AMNIGA GUDAHA**

## Warbixin Kooban

Tan iyo markii ay burburtay Dawaladdii dhexe ee Soomaaliya Sanadkii 1991, dalka Soomaaliya waxaa soo wajahay Dagaallo sokeeyo oo wajiyo badan leh, waxaanna ka abuurmay wadanka Kooxo xagjiriin ah oo ka faa'iideystay Dagaalkii Sokeeyay. Malaayiin ka mid ah bulshada Soomaaliya waxay u qaxeen oo nolol iyo dhaqaale ka raadsadeen waddamda caalamka sida Waqooyiga Ameerika, Yurub, Dalalka Khaliijka Carabta, Africa iyo wadamada deriska.

## Soomaalida joogta Adduunka

Waxaa jira boqollaal Kun oo Soomaali ah oo ku nool daafaha caalamka, gaar ahaan wadamada reer Yurub, sida Boqortooyada Ingiriiska, Holland, Talyaaniga, Faransiiska, Jarmalka iyo waddamada kale ee Iskandaneefiyanka ah.Inta badan bulshada Soomaaliyeed ee ku nool dalalkaas kor ku xusan waxay iyaga qoysaskooda noqdeen muwaadiniin leh xuquuq la mid ah kuwa asal ahaan u dhashay waddamadaas .

Lama hayo tiro sax ah dadlka Soomaaliyeed ee qaxootiga ka raadasanaya dalalka Caalamka oo dhan, kuwaas oo sugaya waraaqihii iyo sharciyadii ay ku degilahaayeen dalalka magan gelyada siinaya. Kuwo kale, waxay ku tala jiraan in ay ka mid noqdaan kooxdan iyagoo soo geliddooda laga baarayo arrimo la xiriira sharci darro iyo Isxambaar.

## Qeybaha kala ee Soomaalida ku soo noqoneysa Dalka

Jamhuuriyadda Soomaaliya si tartiib-tartiib ah ayay u soo hagaageysaa. Waxayna soo dhaweysay dad badan oo iskood uga soo noqonaya adduunka oo ku soo noqonaya Dalkooda hooyo.

Inta badan dadkaas waxay heystaan wax ay ku noolaadaan iyo wax ay gacan kaga geystaan horumarka Soomaaliya. Soomaaliya waxay soo dhaweynaysaa dadka iskood u soo noqonaya, maxaa yeelay,waa Soomaali aan dhibaato nabad galyo xumo u keeneyn Amaniga Qaranka.

Waxaa sidoo kale jira kuwo codsigoodii qaxootinimo ay u diideen hay'adaha socdaalka ee dibedda iyo kuwo kale oo dambiyo ka galay dalalka ay tageen, sidaa darteedna ay ku noqdeen kuwo laga soo masaafuriyo dalalka ay joogaan.

## Siyaasadda Dowladda Soomaaliya ee ku wajahan dadka la soo musaafuryo.

Inkasta oo xaaladdaha siyaasadeed iyo nabad gelyo ee dalka ay abuureyso jawi deganaasho oo dad badan oo qaxooti Soomaaliyeed ah oo iskood ugu soo noqonaya dalka, balse Dowladda Soomaaliya diyaar uma aha in ay aqbasho dadka loo soo musaafiranayo sababo nabad gelyo, siyaasadeed ama dhaqaale awgood, gaar ahaan kuwa ku lug yeeshay arrimo la xiriir dambiyo culus, kuwaas oo la imaan kara dhibaatooyin carqaladeynaya Amniga iyo Horumarka ay ku talaabsatay Dowladda iyo hay'adeheeda muhiimka ah.

Dowladda Soomaaliya waxay xoogga saaraysaa dhinac kasta oo ku saabsan barnaamijyada siyaasadeed ee ku wajahan Hiigsiga 2016-ka taas oo abuuri karta, xaalad nabadeed oo waarta oo lagu soo celin karo muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Iyadoo taas ay ka harsan tahay hal sano haddane waxaa wax badan laga qabtay dhinaca nabad-gelyada iyo dhismaha hay'adaha Dowladda.

Soomaaliya waxay hanatay guulo waxayna si taxadar leh ula dagaalamaysa cid kasta oo wax u dhimaysa horumarkeeda.

Horumarka laga sameeyay ilaha halbowlaha ah dhaqaalaha iyo hormarka , waa la sii adkaynayaa, ka hor inta aan Dalku aqbalin dad badan oo la soo musaafuriyey oo u keena dib-u-dhac weyn dalkeena oo weli nugul.

Soomaaliya waxay diidi doontaa soo celinta qof kast oo u keenaya khatar muuqata oo wax u dhibi karta xasilinooda iyo nabada gelyada Qaranka.

Si kastaba ha ahaatee, yadoo la fiirinayo Qod. 13aad ee sharciga xuquuda Aadanaha ee Qaramada Midoobay oo u qoran sida tan "ruux waliba waxa uu xaq u leeyahay in uu safro, isagana gudbo xudduudaha uu rabo".

Sidaas awgeed, Dawladda Soomaaliya iyadoo sharcigaasi tixgelinayso sidoo kalena sugaysa ammaankeeda waxay diyaar u tahay in ay kala shaqeyso dowladaha ay saaxiibka la tahay soo celinta dadka la soo musaafurinayo iyadoo la raacayo shuruudaha soo socda:

- Qofkasta oo doonaya dib-ugu celin Soomaaliya waa in uu caddeeyo Soomaalinimadiisa, waana in uu yahay qof ka yimid Gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliiya.

- Waa in ay sameeyaan Dowladda soo musaafiranaysa dadka iyo Dowladda aqbalaysa ( Soomaaliya) qiimaynt khatarta ka iman karta qof kasta oo la soo musaafurinayo,

- Dhammaan dadka la soo celinayo waa in ay lahaadaan meel cayiman iyo qoys lagu soo celiiyo oo si sahal ah lagu gaari karo Dalka gudihiisa,

- Dadka u baahan daaweynta dhimirka laguma soo celin karo Soomaaliya ilaa loo diyaariyo adeeg iyo taageero aqooneed.

- Soomaaliya marna ma aqbali.doonto soo celinta qaar ka mid ah dambiilayaasha oo ay ka mid yihiin kuwa maskaxdooda la rogay, kuwa haweenka ku xad gudba iyo dambiilayaasha kale,

- Dhammaan dadka la soo celinayo ee leh taariikh dambiyeed, waa in ay xabsigooda ku dhameystaan dalalka laga soo celinayo ka hor inta aan lagu soo celin Soomaaliya,

- Dowladaha daneynaya in ay soo musaafuriyaan dambiilayaasha waa in ay u soo bandhigaan baarista taariikh dambiyedka mas'uuliyiinta Soomaaliyeed ee ay quseyso ka hor inta aan go'aan laga gaarin soo celintooda.

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay ku dadaaleysaa wanaajinta xaaladda xuquuqda bini-aadanimo ee dhammaan muwaadiniinteeda.

Qaxootiga dhabta ah iyo kuwa la filayo, waxaa la weydiindoonaa, haddii iyo marka ay yimaadanba, in ay si dhab ah u dhexgalaan bulshada Soomaaliyeed iyo in ay ka qeyb qaataan horumarinta dalka. Si loo gaaro arrinkan, tallaabooyinka soo socdaa waa muhiim:

- Dowladda Soomaaliyeed waxay furaysaa Xafiiska Maamulidda dadka Soo noqonaya, kaas oo isku duwi doona isagoo la kaashanaya Laanta Socdaalka iyo Waaxyaha Booliska si ay ugu fududeeyaan dadka soo noqonaya in ay si nabad gelyo iyo xasiloona ah u dhexgalaan bulshada Soomaaliyeed:

- Dhammaan dadka soo noqonaya ee dambiyada leh, haddii la oggolaado, waa in ay maraan muddo tijaabo ah oo lagu kormeerayo iyo taageero muddo hal sano ah lagu siinayo meeshay doortaan.

- Waa in la sameeyaa xarun boolis gaar ah si ay u dabagalaan dadka soo noqday markay dalka soo gelaan.

- Dowladda soo musaafiranaysa Dadka soo noqonaya waa in ay siiyaan **$10,000** qofkiiba marka ay Soomaaliya yimaadaan

Ma sahlana Soo noqodka iyo isdhexgalka Soomaalida xilligan la soo musaafiranayo. Ilaalinta xuquuqda bini-aadan-nimo waa in ay la socotaa baahida dhabta ah ee lagu xoojinayo amniga qaranka iyo la dagaalanka Argagixisada dalka gudihiisa iyo gobalka oo idil.

Iyadoo taas laga ambaqaadayo, waan in la xoojiyo awooddo hay'adaha,lana dejiyo sharciyada loo baahanayan in la meel mariyo.

Dowladda Fedraalka Soomaaliya waa in ay ka ilaalisaa dhammaan muwaadiniinteeda dhibaatooyinka ay keeni karaan dadka soo noqonaya.

Si loo fuliyo siyaasadan, Dowlada Federaalka Soomaaliyawaa in ay dhisto hay'adaha halbowlaha u ah fulinta siyaasadan. Hay'adahan waxay yihiin, xafiiska maamulida dadka la soo celinaayo, saraakiil qiimeynaya qataraha ay la imaan karaan, siyaasadan waxay dhaqan gali doontaa marka la dhameystiro hay'adaha kor kuxusan.
Muddada fog, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay la shaqeynaysaa Hay'adaha ay is garabsadaan si ay u abuuraan jawi u diidaya Soomaalida in ay u boqoolaan dibedda, Dawladda Fadaraalka Somaaliya waxay la shaqeyn doontaa bulshada caalamka si looga hortago dhoofidda sharci darrada ah iyo Is-xambaarka.

Tallooyinka kor ku xusan ayaa horseedi kara.

- In nabadda soomaaliya ay sii wanaagsanaato oo aysan dhinaca dadka soomaalida ah ee dibadaha laga soo celinayo ayna u keenin dhibaatooyin hor leh.

- In dawladda Soomaaliya ay oggolaato soo celinata dadkaSoomaaliyeed ee aan khatar ku aheyn nabadda & hormarka Dalka

- In iskaashiga waddamada soo celinaya dadka Soomaaliyeed iyo dawldda Soomaaliya uu noqdo mid mira dhal ah.

Ugu dambeyntii, Wasaaradda Amniga Gudaha waxay ilaalinaysaa habsami u socodka iyo fulinta barnaamijyada dadka lagu soo celinayo Soomaaliya.

Halka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Dhiiri-galinta Maalgashigu waajibaadkeeda uu yahay kala xaajoodka Dowladaha soo celinaya dadka Soomaaliyeed sidii ay si nabad galyo leh ugu soo noqon lahaayeen Dalkooda hooyo.

**Muqdisho, 18/08/2015**

**Abdirizak Omar Mahamed .**
**Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha**